

Casharka taad

WAADIGA DUGSIYADA (HEES)

Heestan waadiga dugsiyada waxaa allifay abwaankii waynaa Xasan Sheekh Muumin. Waxaana ku luqeeya fannaankii waynaa Maxamad Mooge Liibaan. Heestan waa hees guubaabo ah. Ardaydu waxay leeyihiin "waxaan nahay waadiga dugsiyada, waxaan nahay waanada macallinka" Heestu waxay ardayda ku guubaabinaysaa in ardaydu si fiican ay wax u bartaan, si ardaydu ay cilmi dalka anfaca u bartaan. Si markaasi waddanka Soomaliya uu u noqdo waddan horumar gaadha oo nabad iyo barwaaqo ku waara.

Waxaan nahay waadiga dugsiyadaa
Waxaan nahay waanada macallinka

Waxaan nahay waadiga dugsiyadaa
Waxaan nahay waanada macallinka

Waagii beryaba ubax laga waraabshoo
Waagii beryaba ubax laga waraabshoo

Waxaan ku werweraynaa

Waddankiina wax u barta
Waddankiina wax u barta

Oo xambaara waajibkiisa
Oo xambaara waajibkiisaa

Wahsan mayno
waaban mayno
Warwareegi maynoo
Weecweecan mayno

Wahsan mayno
waaban mayno
Warwareegi maynoo
Weecweecan mayno

Waadiga dugsiyada Ardayda dugsiyada

Waanada macallinka aqoontii macallinka

Ubx laga waraabshoo Ubx biyo lagu waraabshoo

Oo xambaara Oo guta waajibkiisa
waajibkiisa

Waaban maynoi Gabban mayno

Weecweecan mayno Leexleexan mayno

Guul wacan

Cadawgu waabto

Nolol wanaagsan

Iyo barwaaqo

Nabad lagu wadaagoo

Ha ku waaro waddankeenu

Cadawugu waabto

Cadwagu naga cab-
sado

Ha ku waaro waddan-
keenu

Nabad ha ku waaro
waddankeenu

Guul wacan

Cadawugu waabto

Nolol wanaagsan

Iyo barwaaqo

Nabad lagu wadaagoo

Ha ku waaro waddankeenu

Waddankeenu waa

Wadnihii jidhkeena

Waraabinaayey dhiigoo

Waan ku wardiyeynaa

Waraabinaayay dhiigga

Jidhka dhiigga

Waan ku wardiyaynaa

Waan ilaashanaynaa

Waddankeenu waa

Wadnihii jidhkeena

Waraabinaayey dhiigoo

Waan ku wardiyeynaa

LAYLISYO

Qaybta 1aad: Ka jawaab su,aalaha soo socda

1) Maxaa laga wada macnaha tuducdan ”*Waxan nahay waadiga dugsiyadaa
Waxaan nahay waanada macallinka*”

.....
.....
.....

2) Maxaa laga wada macnaha tuducdan “*Waddankeenu waa Wadnihii jidhkeena
Waraabinaayey dhiigoo Waan ku wardiyeynaa*”.

.....
.....